



Oregon  
**Health**  
Authority

**Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Gaadiidka caafimaadka aan degdeg ahayn (NEMT) waa faa'iidooyinka OHP oo la bixiyo/daboolo.



health  
share  
Health Share of Oregon

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban (degaannada Clackamas, Multnomah iyo Washington).



**CareOregon, Kaiser Permanente, Legacy Health/PacificSource, OHSU iyo Providence Health & Services** waa bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya in ay bixiso daryeel. Iyada oo la adeegsanayo adeegooda macmiilka iyo kooxdaada isku duwida daryeelka, waxay kaa caawiyaan in aad hesho daryeelka caafimaadka jirka, ilkaha iyo maskaxda iyo daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka. Adeegyada turjumaadaha ayaa lagu daboolayaa/bixinayaa qorshayaashan caafimaad.



RIDE  
to CARE

**Ride to Care** wuxuu kaa caawiyaa in aad gaarto balamaha daryeelka caafimaadka iyo adeegyada ay Health Share daboolo. Ride to Care wuxuu kaala shaqeyn doonaa in aad hesho adeegyada NEMT oo ku habboon baahiyahaaga. Tani waxay noqon kartaa lacagta loogu talagalay gaadiidka dadweynaha, lacagaha magdhawga ee masaafada la socdo ama gaari raacista la bixiyo. Ride to Care waxaa sidoo kale dhici karta in ay la xiriirto daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah si ay u xaqiijiyo in aad ka qayb qaadano adeegyada ay daboolo/bixiso Medicaid.



**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale. PCP aad leedahay ama daryeel bixiyayaasha caafimaadka oo kale ayaa kaa caawin kara diyaarinta gaadiidka, sidoo kale.